



Ku soo dawaaw HIGH VIEW PRIMARY SCHOOL, oo ah dugsi u adeega bulsho firfircoon oo faraxsan oo degan Battersea-Wandsworth, waxu ku yaal dugsiga meel looga socon karo Clapham Junction Station dhowr daqiiqado oo socod ah, oo ka farcanta St. John Hill

Mabda,eenu waa

Qofkasto oo ka shaqeyo dugsiga waxuu daacad u yahay in uu siiyo ubad walba, bilaaw noolal fiican, waxaana leenahay xirmo mabaa,di ah oo qeexan oo ayideysa arintan. Kuwaas oo ah: Qadarin, Higsii, Naxariis iyo Bulsho Jirjiroola ah oo leh Iskaashi.

Waxaad mabaa'dideena ku arki karta dugsigeena, ayaado ka muuqato duruusta iyo waxbrasdaba. Kuwaas waxey ka caawini ubadkeena in ey u koran si kalsooni ah, iyo in ey noqdaan waxa ugu fiican, oo ey noqon karaan.

Noolasha dugsiga High View

Manhajka dugsiga High View waa mid hodan ah, dhiirigelin leh, oo xambaarsaan seero khibrada iyo fursado leh. Maadooyinka ugu muhinsan waa, xisaab, English, science iyo P.E. kuwaas waxa dhameystiri maadoyin saldhig ah, sida geography, history, computing iyo waxbrasho Diin. Waxaan nassib ku leenahay in aan qabno, macalimiin ku takhasusay art, PE, Spanish iyo music.

Ujeedkeenu waa in aan ubadka wax barno si uu u gaaro awoodiisa tan ugu sareysa. Wanaagsanaanta ardayga waa ubad dhaxaadka, wax kasto oo aan sameyn

Our indoor and outdoor classrooms,

waxey siin ardayga xasillooni iyo bey'ad nashaad leh, halkaas oo ubadka lagu dhiirigalin in ey wax bartaan, wax soo ogaadaan, iyo in ey wax weydiiyaan, ayago heysta fursado waxbrashoo oo badan.

Iskaashiga ayaan la leenahay waalidiinta/daryeelayaasha iyo bulsha weynta, si aan u xaqiijino guul gaarida ubadkeena.

Kulanka waalidiinta ee todobaadlaha ah, waxu fursad u siin qoysaska in ey wax badan ka fahmaan, maadoyika gaarka ah,tusaalo, sida aan u dhigno xisaabta, iyo arimo kale oo la xiriiro e-safety. Kulanka nus teeramka ah, waxu siin waalidiinta/daryeelayaasha fursad in ey weydiyaan su,aalo iyo in ey ra,yi dhiibtaan, teeram walba waxu leeyay hal subax oo kulan furan ah, halkaas oo waalidiinta/daryeelayaasha lagu casuumo fasalka, si ey uga qeyb qaataan waxbrashadda ubadkooda. Waxa sanadkii jiro 3 kulan waalid ee fiidki ah, taas oo awood u siin waalidka, in ey helaan wadaxaajood dheeri ah oo kulug leh, horumarka ubadkooda. Waxey annaga nala tahay in ilmaha xaq u leeyihiin in

ey helaan fursadaha ugu fiican ee noolasha, iyo in ey si fiican wax u baran hadduu fiican yahay xiriirka dugsiga iyo guriga. Dugsiga waxu xiriir adag la leeyahay 'Friends of High View' kuwa waa hey,ad samafal, oo ey maamulaan waalidiinta iyo daryeelayaash firfircoon, oo gacan ka geysta wada shaqeynta iyo habdhaqanka bulshada, ayago soo uruuriyo maaliyad lagu taakuleyo ardadeena.

#### Wrap-around care

High View waxu leeyahay daryeel, dugsiga ka hor iyo dugsiga ka dib. Naadiga quraacda (Breakfest Club), oo bilaaban 07.50 subaxnimo, iyo daryeelka dugsiga ka dib, oo dhammaan 6.00 galabnimo. Labada naadi waxey bixiyaan cunto caafimaad leh iyo ciyaaro habeysan oo naga caawiyo howl maalmeedka. Ilmaha jooga Wrap-aroud care, waxey isticmaali karaan maktabadeena (library), e-learning software, qalabka PE iyo games iyo toys badan. Adeegan waa mid qiime leh oo tartan ah, waa mid ey yaqaanaan waalidiinta/daryeelayasha, ka shaqeya mandiqada maxalli ah iyo kuwa u safra bartamaha London.

#### Extra curricular clubs

Naadigeena dugsiga ka dib waxu bixiya, manhaj leh nashaado kala duwan oo kala ah martial arts ilaa brashada giitaarka. Kuwan waxey is-bedelaan teeram walba, si loo siiyo ubadka in ey isku da,yaan wax yaala kala duwan. Annagu waxaan isku dayna in aan qiimaha hoos u dhigno, si ey ugu suurta gasho ubad badan in ey sameyaan wax cusub ama nashaad ey jecelyihiin.

Anigu waxa sharaf ii ah in aan ahay Maamulaha dugsigan hodanka ah, oo ah dugsi bulsha kala duwan oo matalo qeyb mashquul ah oo ka mid ah London. Dugsiga High View waxa dhigta ilma ka soo kala jeeda asal iyo dhaqan kala duwan, oo wax wada barta, koox walba waa la qadariya oo la taageera, oo la dhiirigaliya.

Fadlan, waqti sii si aad u fiiriso websitekeena, oo aad wax badan ku ogaato.

Sikastaba, waxaan aad ugu farxi laha , haddii aad nagu soo booqata dugsiga , oo ka waxtar badan, intii aad fiirin lahayd websitekeena, si aan kuugu soo wareejiyo dugsigan cajiiba ah, haddii aad tahay waalid rajo leh, fadlan sameyso ballan si aad u soo booqoto High View, adigo soo wici teleefoonka dugsiga

Add ayaan ku soo dhaweyn

Georgina Roberts

Maamulaha Dugsiga